

# Natijada Baarista Maqalka Dhegaha

Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_

Taariikhdiit Qiimeynta: \_\_\_\_\_

## Natijadii Dhegta MIDIG

<i>Heerka Maqal La'aanta</i>	<i>Nooca Magal La'aanta</i>
– Caadi	– Mid Xanniban
– Mid Liita	– Mid Neerfe Xumaaday
– Mid Kala-bar Xumaaday	– Mid Laba Dhibaato
– Mid Daran	– Mid Aan la Ogeyn
– Mid Aad u Daran	– Neerfe-maqalku ka Xumaaday

## Natijadii Dhegta BIDIXE

<i>Heerka Maqal La'aanta</i>	<i>Nooca Magal La'aanta</i>
– Caadi	– Mid Xanniban
– Mid Liita	– Mid Neerfe Xumaaday
– Mid Kala-bar Xumaaday	– Mid Laba Dhibaato
– Mid Daran	– Mid Aan La Ogeyn
– Mid Aad u Daran	– Neerfe-maqalku ka Xumaaday

### Maxaa sababa maqal la'aanta?

**Maqal-la'aanta dhegta xanniban** waxaa sababa dhibaatooyin uga yimaada dhegta qeybleeda dhexe ama bannaanka, sida kanaalka dhegta, durbaanka dhegta ama lafaha dhegta, oo waxa sidaas ku xannibmaya wax dhawaaq ah in ay gaaraan dhegta gudaheeda.

**Maqal-la'aanta neerfuhu xumaaday** waxaa sababa dhaawac ama in uu shaqeyn waayaan dhegta qeybleeda dhexe ama neerfaha maqalka. Maqal la'aanta noocan ah waxay noqon kartaa mid joogto ah iyo mid lagu dhasho ama la isku arko sannado ka dib.

**Maqal-la'aanta ah laba dhibaato** macnaheedu waa in ilmuu qabo maqal-la'aan ah dhawaaqa oo xanniban iyo nooca uu neerfuhu xumaaday.

**Neerfe-maqalka xumaaday** waa wax dhaca markay qeybta gudaha ee dhegtu si fiican u shaqayneyo, laakiin dhibaatadu waa gudbinta codka ee dhegta gudaheeda ilaa maskaxda.

### Sidee lagu ogaadaa maqal-la'aanta dhegaha?

Xirfadleyaasha maqalka ayaa sameyn kara baaris ay ku ogaan karaan maqal-la'aanta. Waxaa baarista ka mid ah: wiisiteynta dhegta bannaankeeda, gudaheeda, xawaaraha maqalka, otoacoustic emissions (jawaabta dhegta qeybleeda dhexe ama OAE), auditory brainstem response (qiimeynta dhawaaqa ee jawaabta maskaxda ama ABR), iyo eegista maqalka dhawaaqyada kala duwan.

### Maxaa kale oo aan u baahnahay?

Daaweynta maqalka waxay ku xiran tahay heerka, nooca iyo sababta keentay maqal la'aanta. Xirfadlaха maqalka ee ilmahaaga iyo Ear, Nose and Throat (dhakhtarka Dhegaha, Sanka iyo Cunaha ama ENT) ayaa kala shaqeyn doona qoyskaaga si loo go'aamiyo daaweynta ugu fiican ee ilmahaaga.

### **Waxyaabaha lagu talinayo**

- In lagu celiyo qiimeynta maqalka dhegaha si loo xaqijiyo natijjooyinka. *Ballan:* \_\_\_\_\_
- U-gudbinta Ear, Nose and Throat (dhakhtarka Dhegaha, Sanka, iyo Cunaha ama ENT). *Ballan:* \_\_\_\_\_
- Qabso Ballanta Qiimeynta Qalabka Maqalka. *Ballan:* \_\_\_\_\_
- La-soco oo ogeysii dhakhtarka daaweynta ee ilmaha.
- U-gudbinta barnaamijka lagu caawiyo maskaxda ilmaha ee Help Me Grow.
- U-gudbinta barnaamij ah taageerada waalid-ilaa-waalid ee MN Hands & Voices.

**Su'aalo?** Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la soo xiriir Qeybta Maqalka ee Children's Minnesota 612-874-1292.